

MAGAALADA BRISTOL

**XAAFADDA EAST BRISTOL LIVEABLE NEIGHBOURHOODS, EASTON, LAWRENCE HILL,
ST. GEORGE CENTRAL, ST. GEORGE TROOPERS HILL AND ST. GEORGE WEST
DEGMOOYINKA, WADOOYINKA LOO XIRAY BASASKA, MAMNUUCISTA BAABUUR KU
WADISTA, DARIIQYADA HAL DHINAC LOO MARO
IYO WADOOYINKA BAASKIILADAHA EE BAABUURTA KA HORTAGA, MAMNUUCISTA IYO
XADIDAADA
SUGITAANKA, IYO GOOBAHA BAABUURTA DHIGASHADA - AMARADA GAADIIDKA**

Golaha Deegaanka ee Bristol waxay halkan ku OGAYSIINAYAAN inay soo jeedinayaan inay sameeyaan amarrada soo socda ee gaadiidka si ay u taageeraan qorshaha 'East Bristol Liveable Neighbourhood', ujeedaduna waa in la isu dheelitiro isticmaalka waddooyinka ee dadka deegaanka iyo baabuurleyda:-

- A. **CAE/RGW/P-1282A** - Golaha Deegaanka Magaalada Bristol (Avonvale Road, Marsh lane and Pilemarsh, Easton, Lawrence Hill, St. George Central, St. George Troopers Hill and St. George West Wards, City of Bristo) (Haadadka Basaska U Gaarka ah) Amar 202-, saamayntiisu waxay noqonaysaa in la soo bandhigo waddooyin labada dhinacba loo maro oo basaska oo keli ah u gaar ah (Iridaha baska) kuwaas oo raacsan Avonvale Road, Marsh Lane iyo Pilemarsh si loogu isticmaalo basaska, baaskiiladaha, gaadiidka adeega dadwaynaha, mootooyinka hal qof saaran yahay, tagsiyada iyo gaadiidka ogolaanshaha u haysta.

Ogolaanshaga meelaha laga soo galayo Waddooyinka Basaska ee East Bristol Liveable Neighborhood (Iridaha Baska) waxa baabuurta diiwaangashan la siin doonaa marka ogolaansho qoraal ah laga helo Golaha Deegaanka.

- qoysaska haysta carruurta leh Baahiyaha Waxbarashada Gaarka ah iyo Naafada ah (sida lagu qeexay Qaybta 20aad ee Xeerka Carruurta iyo Qoyska 2014) kuwaas oo hela Miisaaniyadda Safarka Shakhsi ahaaneed (PTB) (sida waafaqsan qaybta 508B ee Sharciga Waxbarashada 1996) oo dhex deggan aagga la soo jeediyay in laga sameeyo East Bristol Liveable Neighbourhood
- bixiyayaasha daryeelka ee u tagaya dadka degan xaafada la soo jeediyay ee East Bristol Liveable Neighborhood
- dadka degan xaafada la soo jeediyay ee East Bristol Liveable Neighborhood kuwaas oo baabuurtoodu hesho cashuur dhaafka wadada oo ay tahay in lagu diwaan galiyo magaca qofka naafada ah ama magaca dirawalka ay magacabeen

- B. **CAE/RGW/P-1282B** - Golaha Deegaanka Magaalada Bristol (Waddooyin kala duwan, Dariiqa Aagga Victoria, Easton, Lawrence Hill, St. George Central, St. George Troopers Hill iyo St. George West Wards, ee Magaalada Bristol) (Mamnuucista Gaadhi ku Wadashda) (Baabuurta Hal Dhinac u Socota, Baaskiilayda ka hortagaysa Baabuurta socota iyo Haadka loogu talalgay Baaskiilayda Ka hortagaysa Jihada Baabuurta) Amarka 20--, taas oo saameynteedu noqon doonto:-

1. in laga mamnuuco baabuur kasta inuu galo ama ku socdo inuu raaco **Barnes Street, Barton Hill Road, Beaufort Road, Cobden Street, Ducie Road, Glebe Road, Lincoln Street, The Avenue, Wicket Lane;**

2. in la soo kordhiyo jid baabuurtu hal dhinac u raacaan (marka laga reebo baaskiisha) kuwaas u soconaya:-

(a) jihada waqooyi ee **Waddada Cobden**; iyo

(b) jihada koonfureed ee **Waddada Morton**;

3. in dib u eegis lagu sameeyo jidadka hal dhinac loo maro ee ka jira waddooyinka **Mildred Street, Northcote Road, Queens Road** iyo **Verrier Road** si loogu soo daro in sharciga halka dhinac laga dhaafay baaskiisha;

4. in meesha laga saaro in hal dhinac loo maro waddooyinka **Barnes Street, Cobden Street** (koonfurta Morley Street/Victoria Avenue), **Ducie Road, Glebe Road, Grindell Road** iyo **Wicket Lane**;

5. in meesha laga saaro haadka baaskiisha ee ka hortagaya baabuurta ee Waddada Cobden (koonfurta Victoria Avenue);

6. in qayb ka mid ah waddada School Street laga mamnuuco in baabuurta lagu wato waqtiyada Isniin - Jimce 8:30am illaa 9:15am iyo 2:40pm illaa 3:30pm iyo qayb yar oo ka mid ah dhammaadka bari ee **Victoria Avenue** oo hal dhinac loo mari jiray oo iyana guud ahaan laga mamnuucayo baabuurta ku wadashada (marka laga tago baaskiiladaha baytalka leh)

7. in la soo bandhigo qayb cusub oo baabuurta lagaga mamnuucayo waddada **Victoria Avenue** inta u dhaxaysa isgoysyada Byron Street iyo Morse Road; iyo

8. in wax laga beddelo wakhtiyada shaqada ee inta ka hadhay waddada School Street ee laga mamnuucay

in baabuurta lagu wato ee waddada **Victoria Avenue** lagana soo beddelo Isniin - Jimco 8:30 subaxnimo ilaa 9:15 subaxnimo iyo 2:40 galabnimo ilaa 3:30 galabnimo loona soo beddelo Isniin - Jimco 8:30 subaxnimo ilaa 9:15 subaxnimo iyo 3:10 galabnimo ilaa 3:50 galabnimo taas oo waafaqsan saacadaha shaqo ee cusub ee dugsiga School Street.

Amarada horay u jiray ee sheegayay ee amrayay in jidadka hal jiho loo maro iyo kuwa sheegayay in jidka hal jiho loo marayo laakiin baaskiiladaha laga dhaafay ee waddooyinka Byron Street, Cobden Street (waqooyiga Morley Street/Victoria Avenue), Cossham Road, Leonard Road, Morse Road, Netham Road, Pilemarsh Road, Richmond Road, Salisbury Street, Seneca Street, Sherbourne Street, Victoria Street, Weight Road, Witchell Road iyo Worsley Street, aiyo hadadka baaskiiladaha ka hortagaya jihada baabuurtu u socoto ee kajiray waddooyinka Cobden Road (waqooyiga Morley Street/Victoria Avenue), Netham Road iyo Victoria Avenue iyagoo oo sidoodii ah oo aan waxba laga beddelin baa amarkan lagu soo darayaa.

Goluhu wuxu ku qancay in qodobka la soo jeediyay ee mamnuucaya baabuur wadashada ay tahay inuu shaqeeyo wax ka badan 8 saacadood oo muddo kasta 24 saacadood ah si looga hortago khataraha wajahaya dadka ama gaadiidka isticmaalaya waddada amarka khuseeyo ama waddo kasta oo kale, ama si looga hortago in khatarahaas dhacaan marka horeba.

C. **CAE/RGW/P-1282C** - Golaha Deegaanka Magaalada Bristol (Waddooyin kala duwan, St. George Area, Lawrence Hill, Easton, St. George Central, St. George Troopers Hill and St. George West

Wards, ee Magaalada Bristol) (Mamnuucida iyo Xayiraadda Sugitaanka) (Mamnuucida Joogsashada) (Goobaha Rar Qaadista) (Goobaha Dhigashada Baska) (Goobaha Dadka Naafada ah Baabuurta Dhigtaan) (Goobaha Baabuurta Wadaaga ah la Dhigo) Amarka 202-, oo saameyntiisu noqon dooto:-

1. in la soo kordhiyo mamnuucidda baabuur dhigashada iyo cid ku sugista qaybo ka mid ah waddooyinka **Arthur Skemp Close, Atchley Street, Barton Court, Butlers Close, Charlton Street, Claremont Terrace, Cotton Mill Lane, Diamond Road, Ebenezer Street, Ford Street, Glendare Street, Granville Street, Great Western Lane, Handel Avenue, Hedwick Avenue, Hedwick Street, Herapath Street, Jubilee Road, Lambley Road, Lewin Street, Malvern Road, Parkfield Avenue, Peters Terrace, Quayside Lane, Queens Road, Robert Street, Shaftesbury Terrace, Speedwell Avenue, St. Georges Avenue, St. Patricks View, Summerhill Terrace iyo Weston Avenue;**
2. in dib loo eego mamnuucida baabuur dhigashada qaybo ka mid ah waddooyinka **Avon Park, Avonvale Road, Barnes Street, Barrow Road, Barton Hill Road, Beaconsfield Street, Beam Street, Beaufort Road, Blackswarth Road, Bradhurst Street, Chancery Street, Cobden Street, Cooperage Road, Cossham Road, Crews Hole Road, Derby Street, Ducie Road, Fireclay Road, Gladstone Street, Glebe Road, Grindell Road, Holmes Street, Lincoln Street, Marsh Lane, Morley Street, Morton Street, Napier Street, Netham Road, Northcote Road, Old Lamb Close, Richmond Road, Salisbury Street (Lawrence Hill), Salisbury Street (St. George), Sarah Street, Seneca Street, Sherbourne Street, Stuart Street, The Avenue, Tichborne Road, Victoria Avenue, Wicket Lane iyo Worsley Street;**
3. in dib loo eego xayiraada baabuur dhigashada qaybo ka mid ah waddooyinka **Avonvale Road, Beam Street, Blackswarth Road, Ducie Road, Lincoln Street, Northcote Road, Richmond Road, Sarah Street iyo Seneca Street;**
4. in la qaado xayiraadda baabuur dhigashada qaybo ka mid ah waddooyinka **Cossham Road, Ebenezer Street, Salisbury Street iyo Sherbourne Street;**
5. in dib loo eego mamnuucida in baabuurta rar ka-qaadaan/ku-rogaan qaybo ka mid ah waddada **Richmond Road;**
6. in goob baabuurka wax lagaga rari karo lagu soo kordhiyo dariiqa **Barnes Street;** iyo
7. in waddooyinka **Beam Street** iyo **Tichborne Road** lagu soo kordhiyo goobo dadka naafada ah baabuurta dhigtaa waqtiyada Isniin - Jimce 9 subaxnimo - 5 galabnimo muddo ugu badnaan 2 saacadood ah (loomana ogola inay soo laabtaan muddo 4 saacood gudahood ah).

Fursadda waxa sidoo kale looga faa'iidayaan doonaa in la saxo qaladaadka ka dhex jira sharciyada isku socodka gaadiidka ee jira iyo caalamadaha/sumadaha waddooyinka ku yaalla ee la xiriiira mamnuucida sugitaanka ee la xiriiira halka ay Iskakaga dhacaan waddooyinka **Baden Road** iyo **Hayward Road**, iyo sidoo kale **Cobden Street, Crews Hole Road, Old Lamb Close, Victor Street** iyo **Worsley Street**.

Macluumaad dheeraad ah ayaa la heli karaa laga bilaabo 29^{ka} Janaayo 2024

Tafaasiil dheeraad ah oo ku saabsan dhammaan soo-jeedinaha ku jira amaradan qabyada ah, oo ay la socdaan qorshayaal, nuqullo amarada wax laga beddelayo iyo kuwa la laalayo ah iyo Warbixinta Golaha ee sharraxaysa Sababaha loo soo jeediyay amaradan waxa laga soo daalacaa karaa www.bristol.gov.uk/EBLN-TRO sidoo kale waxaad fiirin kartaa nuqul daabacan oo aad ka helayso Barta Adeegga Muwaadinka, 100 Temple Street, Bristol, BS1 6AG, inta u dhaxaysa 10.00 subaxnimo iyo 4.00 galabnimo maalmaha Khamiis illaa Jimce iyo maktabadaha hoos ku qoran oo aad ka heli karto saacadaha caadiga ah ee ay furan yihiin;

- St. George Library, Church Road, Bristol, BS5 8AL
- Wellspring Settlement, 43 Ducie Road, Barton Hill, Bristol, BS5 0AX

Sida loo diido soo jeedinta

Diidmada soo jeedinta, oo ay weheliso sababaha lagu diiday, waa in la soo gudbiyaa ugu dambayn ~~20ka~~^{Febraayo} **2024**. Diidmada waxaa lagu samayn karaa onlayn iyada oo loo marayo www.bristol.gov.uk/EBLN-TRO ama in iyadoo qoraal ah loo diro Kooxda Amarrada Xakamaynta Isku-socodka Gaadiidka (100TS), PO Box 3399, Bristol, BS1 9NE iyadoo tixraaca kor ku xusan ee ku habboon ku soo dulqoraya. Fadlan ku dar magacaaga iyo ciwaankaga oo ogsonooow in dhammaan dadka ra'yigooda soo dhiibtay oo dhan laga yaabo in Golaha Deegaanku tixgalinayaan inay dadwaynuhu arki karaan taas oo ka dhigan in fikirkaaga oo uu la socdo magacaaga iyo cinwaankaaga ay dadwaynuhu fiirin karaan oo qiimeyn karaan.

A. Hearn, Agaasimaha Ku Meel Gaadhka Ah Dhaqaalaha Goobta. Kooxda Amarada Xakamaynta Gaadiidka (100TS), PO Box 3399, Bristol, BS1 9NE. Taariikhda: 29^{ka} Jannaayo 2024